30-Day Notice for Oregon's Statewide Assessments in English Language Arts and Mathematics

XOOJINTA SINNAANTA IYO XARIIFNIMADA ARDAY KASTA

Oregon waxa ka go'an inay arday kasta u diyaariso aqoonta iyo xirfadaha daruuriga u ah guulaysiga dugsiga sare kadib. Qiimaynaha gobolka Oregon oo dhan ee Fanka Luuqadda Ingiriisiga (ELA) iyo Xisaabta waxay si buuxda u waafaqsan yihiin Heerarka Gobolka Oregon waxayna siiyaan ardayda fasalada 3-8 iyo 11, iyo qoysaskooda, hal wax oo ay ku cabbiraan tacliinta, guulaysiga iyo korriinka.

QIIMAYNAHA OREGON EE GOBOLKA OO DHAN...

- **...waxa dejiyey barayaal ku sugan Oregon** iyo dhawr gobol oo kale
- **...waxay ku cariyaan ilmahaaga inuu si naqdi leh u fekero** kuna dabbaqo aqoontiisa meelo kala duwan
- **...waxay dhaafsiisan yihiin su'aalaha ka-doorada** oo waydiiyaan ilmaha inuu faahfaahiyo jawaabaha
- **...waxay u dhaqmaan sidii sawir muujinaya horumarka ilmahaaga** kaasi oo lala isticmaali karo macluumaadyo kale si loo go'aamiyo guusha tacliineed ee ilmahaaga
- **...waxay ka caawiyaan dugsiyada iyo degmooyinka** inay qiimeeyaan nidaamyadooda waxbarista iyo waxbarashada, sidoo kalena aqoonsadaan kooxaha ardayda ah ee baahiyaha tacliineed ee ay qabaan aan si ku filan loo dabooli karin
- **...waxay ka caawiyaan bulshooyinka** inay fahmaan heerka tayada waxbarashada dugsiyada dawladda

Intee in le'eg ayay ilmahaygu ku qaadanaysaa inuu dhammaystiro qiimaynaha gobolka oo dhan ee Oregon?
Ardayda badankoodu waxay ku dhameeyaan qiimayntooda ELA 1.5 ilaa 3 saacadood iyo qiimayntooda xisaabta 1 ilaa 1.5 saacadood. Sababtoo ah ma jiro wakhti xaddidan oo ku saabsan qiimaynta gobolka oo dhan ee Oregon, ilmahaagu wuxuu qaadan karaa ilaa inta ay u baahan yihiin inay si buuxda u muujiyaan waxay yaqaaniin oo ay samayn karaan.

Waa maxay macnaha natiijadu, halkeese ka helaa natiijada ilmahayga?
Natiijooyinka qiimayntu waxay caddeeyaan meelaha uu ilmahaagu ku fiican yahay iyo meelaha lagu horumarinayo Fanka iyo Xisaabta ee Luuqadda Ingiriisiga. Maado kasta waxaa loo qaybin doonaa qaybo waxayna tusi doontaa sida wanaagsan ee ilmahaagu uga soo baxay aag kasta. Qiimayntu waxay ku cabbirtaa barashada ardayga miisaan u oggolaanaya in la isbarbardhigo waqtiga oo dhan. Waaxda Waxbarashada ee Oregon waxay dejisay afar heerar guul ah oo la socda miisaankan oo guud ahaan qeexaya waxqabadka tacliinta ardayga. Dugsiga ilmahaaga ayaa kula wadaagi doona buundooyinka ilmahaaga dhamaadka sanad dugsiyeedka hadda ama bilowga kan soo socda si ay u caawiyaan taageerada guusha ilmahaaga marka ay ka gudbaan fasalka ilaa fasalka.

Maxay muhiim u tahay ka qaybgalka ilmahayga?
In kasta oo aanay jirin qiimayn keli ah oo bixin karta sawir dhammaystiran oo ku saabsan horumarka ilmahaaga, in ilmahaagu qaato qiimaynta gobolka oo dhan waxay siisaa barayaasha iyo maamulayaasha hal il macluumaad oo ku saabsan hababka waxbarasho ee shaqaynayo iyo halka laga yaabo in loo baahdo ilo dheeraad ah. Ka qaybqaadashada ilmahaaga waa muhiim si loo hubiyo in dugsiyada iyo degmooyinku helaan agabka la beegsaday ee ay u baahan yihiin si ay u caawiyaan dhammaan ardayda inay guulaystaan.

Goorma ayuu ilmahaygu imtixaanka gelayaa?
Dugsiga ilmahaaga ayaa go'aamin doona taariikhaha gaarka ah ee ilmahaagu ku qaadanayo qiimaynta gudaha daaqada imtixaanka gobolka oo dhan. Daaqadaha imtixaanada gobolka oo dhan ee Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga iyo Xisaabta ayaa khuseeya qiimaynaha guud iyo kuwa kale ee gobolka oo dhan.

STAY INFORMED

Booqo Oregon's Starting Smarter webpage (https://or.startingsmarter.org) si aad wax badan uga ogaato waxa ilmahaagu u baahan yahay inuu ogaado oo uu awoodo inuu ku sameeyo Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga iyo Xisaabta, si aad u aragto su'aalaha qiimaynta muunada, iyo inaad wax badan ka akhrido ilmahaaga natiijooyinka imtixaanka. La xidhiidh macalinka ilmahaaga ama maamulaha dugsiga wixii su'aalo ah.

Annual OSAS Opt-Out Form (2022-23)

SHARAXA XUQUUQDA

Sharciga Oregon (ORS 329.479) wuxuu u ogolaanayaa waalidiinta/masuuliyiinta iyo ardayda qaangaarka ah* inay sannad walba ka baxaan Oregon qiimaynta Fananka Luuqadda Ingiriisiga (ELA) iyo/ama Xisaabta iyagoo foomkan u gudbinaya dugsiga uu ardaygu dhigto. Dugsigu waa inuu siiyaa arday kasta oo laga cudur daartay ELA-ga gobolka oo dhan ama qiimaynta xisaabta wakhti waxbarasho oo la kormeerayo inta ardayda kale ay imtixaanayaan.

To opt-out of OSAS statewide assessments in English Language Arts (ELA) and/or Mathematics, this section must be completed by the parent/guardian or adult student:

Magaac Ardayga dambe ee sharciga ah :

Magaac koowaad sharciga ah :

Fasalka Ardayga ee Diiwaangashan:

Dugsiga Ardayga :

Fadlan sheeg OSAS qiimaynaha gobolka oo dhan ee aad ka baxayso:

- ☐ Luuqada Englishka Arts
- ☐ Xisaabta

Si aad dugsiga ilmahaaga uga caawiso inuu si hufan u qorsheeyo maamulka qiimaynta, fadlan foomkan u soo gudbi dugsiga ilmahaaga ugu yaraan toddobaad ka hor maalinta koowaad ee imtixaanka. Ardayda is-diiwaangelisa ka dib marka uu bilowdo daaqadda imtixaanka gobolka oo dhan, waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad ku soo gudbiso foomka 2 toddobaad gudahooda ee diiwaangelinta. Foomkan waxa uu shaqaynayaa kaliya sanad dugsiyeedka hadda socda. Waalidiinta/masuulka iyo ardayda qaangaarka ah waxaa looga baahan yahay inay soo gudbiyaan foom ka bixitaan sanadle ah haddii ay rabaan in laga dhaafo imtixaanada guud ee gobolka oo dhan.

Waxaan fahamsanahay in markaan saxiixo foomkan aan ka dooranayo ilmahayga OSAS qiimaynaha gobolka oo dhan ee ELA iyo Xisaabta sannad dugsiyeedka hadda oo keliya.

Waalidka /Guardian Saxiixa **: Taariikh:

Magaca Daabacan ee Waalidka/Masuulka**:

*Ardayda qaan-gaarka ah (da'da 18 iyo ka weyn) way u saxeexi karaan magacooda umana baahna saxeex waalid ama masuul..

**Ku qor magacaaga sanduuqa saxeexa ee foomka dhijitaalka ah waxay muujinaysaa saxeexaaga rasmiga ah.